## Qorrax-madoobaadka Dhamayska Tiran ee Abriil 8, 2024

Bilow qorsheynta inaad aragto qorrax-madoobaadka xiga ee Vermont. Goobta Vermont ee ku dhex taal dhabbaha qorrax-madoobaadka dhamayska tiran ee 2024 ayaa ka dhigaysa meel wanaagsan oo laga arki karo yaababka iyo muuqaalka dhacdadan dabiiciga ah.

Haddi aad ku nooshahay Vermont ama aad soo booqanayso si aad markhaati uga noqoto muuqaalkan hal mar jiilkiiba soo mara, hubinta in qof walba uu si badbaado leh u arki karo qorrax-madoobaadka sanadkan waa mudnaantayada koowaad.

Abriil 8, 2024 saacadu markay tahay 2:14 galabnimo, qayb qorrax-madoobaad ah ayaa bilaaban doona, markay tahay 3:26 galabnimana, qorrax-madoobaad dhamaystiran ayaa wuxuu madoobayn doonaa cirka maalintii ee Vermont, oo socon doona ilaa 3 daqiiqo. Dhacdadani waxay sii socon doontaa iyada oo ah qorrax-madoobaad qayb ahaanuun ah ilaa 4:37 galabnimo.

## Adaabta Qorrax-madoobaadka

Raadi Goob Daawasho - Hubi in meesha aad qorshaynayso inaad ka daawato qorrax-madoobaadku ay tahay ammaan, furan tahay, la gali karo, oo soo-booqdayaasha soo dhawaynayso. Qorshee inaad timaaddo wakhti ka hor oo soo qaado dhar diirran.

Qorshee Hoyga iyo Socdaalka - Fursadaha hoyga iyo kaamamka waa xaddidan yihiin; hore usii qabso meel aad joogto. Markaad safraysid, qorshee jidkaaga, isticmaal baraha gaadiidka si aad uga ogaato wixii soo kordha, oo filo dib u dhacyo dheeraad ah. Gaadhigaaga gaaska wakhti ka hor ka buuxi oo biyo iyo cunto fudud baakadayso haddii ay dhacdo in aad ku xayiranto jidka baabuurta muddo dheer.

Noqo Mid Tixgeliya Dadka Kale - Dad badan ayaa dooni doona inay booqdaan Vermont si ay u arkaan qorrax-madoobaadka. Hubi inaad si xushmad leh ula wadaagto boosaska deriskaaga. Noqo mid naxariis leh oo ku raaxayso dhacdada dabiiciga ah.

Raac Tilmaamaha – Dhageyso saraakiisha oo raac shuruucda la soo dhejiyay. Isku qor digniinaha oo la soco fariimaha baraha bulshada ee maxaliga ah #VTEclipse. Hubi xeerarka maxalliga ah, warbixinnada khatarta dabka, macluumaadka gelitaanka dariiqa, iyo tilmaamaha kale.

Ixtiraamka Duurjoogta iyo Goobaha Dabiiciga ah - Abriil waa wakhti ku adag duurjoogta iyo goobaha dabiiciga ah ee Vermont. Raadadka oogada ee dabiiciga ah waa ay baabi'i doonaan dhoobada iyo barafka awgood. Ku eekow dooxooyinka iyo meelaha bannaan si aad uga fogaato inaad waxyeello u geysato dariiqyada madadaalada iyo ku tumashada dhirta. Haddii aad la kulanto duurjoogta, ka fogow oo ka tag aagga.

U tuur Qashinka Si Sax ah - Dhacdooyinka baaxadda sare leh iyo meelaha fogfog waxay ka dhigi karaan helitaanka ikhtiyaarada qashinka iyo dib-u-warshadaynta mid adag. Sii qaado waxkasta oo aad soo baakadaysatay, oo ay kamid yihiin wixii qashin ah.

**Ammaanka Eegitaanka**

Habka kaliya ee ammaanka ah ee si toos ah loogu eegi karo qorraxda aan madoobayn ama qayb ka mid ah madoobaatay waa iyada oo la isticmaalayo filtarrada qoraxda ujeedooyinka gaarka ah loo sameeyey, sida "muraayadaha qorrax-madoobaadka" ama qalabka eegitaanka qoraxda ee gacanta lagu qabsado. Muraayadaha caadiga ah, xitaa kuwa aadka u madow, kuma aha ammaan in lagu eego Qorraxda; Waxay gudbiyaan ilays cadceed oo aad uga badan inta indhaheena ammaanka u ah.

Akhri oo raac tilmaamo kasta oo lagu daabacay ama la soo raaciyey filtarka. Had iyo jeer ilaali carruurta adoo isticmaalaya filtarrada cadceedda.

Haddii aad sida caadiga ah xidhato muraayadaha indhaha, xidhnaw. Ka dul xidho muraayadaha qorrax-madoobaadka, ama hortooda ku qabo qalabka eegitaanka qorraxda ee gacanta lagu qaato.

Istaag oo indhahaaga ku dabool muraayadahaaga qorrax-madoobaadka ama qalabka eegitaanka qorraxda ka hor intaadan kor u eegin qorraxda dhalaalaysa. Ka dib markaad qorraxda eegto, ka jeedso oo iska saar filtarkaaga - ha iska saarin adiga oo weli eegaya qorraxda.

Ha ku eegin Qoraxda aan madoobayn ama qayb madoobaatay adigoo isticmaalaya kamarad, telescope, diirad, ama qalab kale oo indhaha ah oo aan filtar lahayn.

Sidoo kale, ha ku eegin Qorraxda kamarad, telescope, diirad, ama qalab kale oo indhaha ah oo aan filtar lahayn adiga oo weli ku isticmaalaya muraayadaha qorrax-madoobaadka ama qalabka eegitaanka qorraxda ee gacanta lagu qabsado indhahaaga hortooda - fallaadhaha qorraxda ee la isku

ururiyey waxay dhaawici karaan filtarka oo waxa ay geli karaan indhahaaga, iyaga oo keeni doona dhaawac halis ah.

Ka raadso talo khabiir cirbixiyeen (astronomer) ka hor intaadan isticmaalin filtarka cadceedda ee leh kamarad, telescope, diirad, ama qalab kasta oo indhaha ah; ogow in filtarrada cadceedu ay tahay in lagu xidho xagga hore ee wixii ah telescope, diirad, muraayadaha kamaradaha, ama muraayadaha kale ee indhaha.

*Ka soo xigtay https://eclipse.aas.org/eye-safety.

## Wararka U Dambeeya iyo Digniinaha

Marka aad qorsheynayso inaad daawato Qorrax-madoobaadka 2024, waa muhiim inaad la socoto isbeddelada, wararka, iyo macluumaadka degdegga ah.

Kala soco #VTEclipse baraha bulshada

## Macluumaadka Safarka

Markaad u safrayso ama dhex safrayso Vermont Qorrax-madoobaadka 2024 awgii, waa muhiim inaad la socoto digniinaha iyo wararka ugu dambeeyay ee safarka.

Wadooyinka Gobolka Vermont: https://newengland511.org/region/Vermont